

Somali

DUGSIYADA DOWLADA SEATTLE (DDS)

FOOMKA OGEYSIINTA XAQU YEELASHADA XUQOOQDA WAXBARASHADA QOOSKA iyo QODOBKA SHARCIGA DOWLADA ee GAARKA ah iyo INAAD FARAHA KA QAADO

Qodobka Xaq U Yeelashada Waxbarashada Qoyska iyo Sharciga kali ahaanshaha (Under the Family Educational Rights and Privacy Act “FERPA”), waalidka ardayda da’dooda ka yar tahay 18 sano ama ardayda da’diisa ka weyn 18 sano (“ardayda xaqa u leh”) waxay leeyihiin xuqooq lagu tixgalinaayo diiwaanka waxbarashada ardayga. Haddii xataa ardayga oo jiro 18 sano, dhigtana dugsiga sare ama la nool yahay waalidkii/wakiilada, ardayga wuxuu leeyahay xaquuqaha sharcigan ku jira. Xuqooqahaas waxaa ka mid ah ah:

Xaq u yeelashada baaritaanka iyo dib-u-hubin ku sameeyo diiwaanka waxbarashada aradyga 45 bari gudahooda maalinta DDS ay helaan codsiga qoraalka ah. Xaq u yeelashada codsiga hagaajinta diiwaanka waxbarashada ardayga oo codsaday waalidka ama ardayga xaqa u leh aamisana in diiwaanka sax ahayn ama marin habaabin jiro. Haddii DDS ay go’aansato in ay diido saxida diiwaanka ay codsadeyn waalidka ama ardayga xaqa u leh. DDS waxay ogeysiinaysaa waalidka ama ardayga xaqa u leh go’aankooda, waxayna kula talinaysaa inay xaq u leeyihiin dacwad ku saabsan codsiga saxida. Waxaa kaloo waalidka ama ardayga xaqa u leh la siinayaa akhbaaro kale oo la xariira qaabka dacwada goorta la ogeysiinaayo xaq u yeelashada dacwada

Xaq u yeelashada siinta ogolaashaha kashifaada akhbaaraha shaqsiyaadka aqoonsiga ardayga oo ka koobma diiwaanka waxbarashada aradyga, ilaa mooyee mida oo ogolaado FERPA kashifaada ogolaasho la’aanta lagu soo sheegin. Waxaana hal ka mid ah ogolaashaha kashifaada lagu soo sheegin shaqaalaha dugsiga sharci ahaan u daneeynaayo waxbarashada ardayga. Shaqaalaha dugsiga waa shaqsiyaadka u shaqeeyo Dugsiga Dadweynaha Seattle sida maamulayaasha, kormeerayaasha, barayaasha, xubnah gargaaro shaqadda, (kana mid ah shaqaalaha caafimaadka, iyo qeybaha shaqaalaha sharciga fuliyo); macalinka ardayga; shaqsiyaadka ka shaqeeyo gudiga sare; shaqsi ama shirkad ay qandaraas la gashay Dugsiga Dadweynaha Seattle in ay sameeyaan howlo gaar ah (sida qareenka, baarayaasha, la taiyaashaha caafimaadka, ama daawayaha dabiiciga); ama waalidka ama ardayga u adeegto gudiga rasmi ah, sida gudiga akhlaaqda ama tacsiyada ama shaqaalo rasmi ah oo dugsiga kale ka cawinaayo fulin shaqo gaar ah. Shaqaalaha dugsiga sharci ahaan u daneeynaayo waxbarashada ardayga si oo dib-u-habeen ugu sameeyo diiwaanka waxbarashada ardayga si oo u fuliyo waajibaadka wax-qabadkooda. Goorta la codsado, Dugsiga Dadweynaha Seattle waxay kashifaysaa diiwaanka waxbarashada iyadoo ogolaasho la’aan shaqaalo dugsiga kale oo ardayga codsaday in oo isku diiwangaliyo ama isku qoray.

Mawaadinku xaq buu u leeyahay in uu fayl gareeyo cabasho una diro Wasaarada Waxbarashada Maraykanka taas ku saabsan waxyaabaha ay DDS ka baaqatay ee xuquuqda qoyska. Waxaa dacwada lagu hagaajinayaa Xafiiska Cabashada Qoyska ee Wasaarada Waxbarashada Maraykanka oo ku yaal 400 Maryland Avenue S.W; Washington, DC 20202.

Tusiyaasha akhbaarta: Qodobka FERPA, akhbaaraha soo socdo waxaa lagu tixgalinaya dadweynaha ama “Tusiyaasha akhbaarta” waxaa la siin karaa cid kastaba, kana mid ah war-baahinta, kuliyaadaha tacliinta iyo jaamacadaha, ciidamada, kooxyaha dhalinyarada, iyo bixiyaasha deeqda waxbarashada, ilaa mooyee inaad u sheegto Dugsiga Dadweynaha Seattle in aad rabin in la siidaayo akhbaarahaan: magaca, adareeska, nambarka taleefoonka, E-mailka, masawirka, taariikhda dhalashada, taariikhda diiwaanangalinta, fasalka, darajada cilmiga sare ama amaala marinta oo helay, goobta waxbarashada sare oo rabo, ka qeybgalka waxqabad rasmi ah iyo kooxyaha ciyaaraha, dherirka iyo culeeska ciyaartooga, dugsiga ugu dambeeyey iyo barnaamijka oo dhigto, iyo akhbaaro kale oo guud ahaan ah wax u dhimeeyn kali ahaanshaha haddii kashifin.

Siideeynta warbixinta ardayda Fasalada Sagalaad ilaa laba iyo Toban (9-12)

Waalidka/wakiilada ardayda dugsiga dugsiga sare ama ardayda xaqa u leh (gaaray 18 jir), Waxaad xaq u leedahay in aad dooratid inta u dhaxeysa (3) doorasho in akhbaarta ardaygaaga ee tusaha ku jira in la siidaayo iyo in kale.

Ciidamada Wadanka Maraykanka ayaa doonaya magacyada, telefoonada, iyo ciwaanka “ardayda dhigata dugsiga sare” Haddii aanad calaamadin sanduuqyada B ama C. Waxay ciidamadu soo codsadaan macluumaadkana bisha Octoobar 1 ee sanad dugsiiyeedka. Markaa haddii aanad rabin in macluumaadka cunugaaga loo gudbin ciidamada calaamadee B ama C, soona celi foomka **1da bisha Octoobar** si loo hubiyo rabitaankaaga diiwaankana laguugu geliyo intaan waqtiga la gaarin. Haddii aanad rabin in camluumaadkaaga loo dirin jaamacadaha, shirkadaha, ,gudiga waalidiinta, ama ciidamada, waxaad calamadaysaa sanduuqa B.

Waxaa lagu dhiirrigelinayaa waalidiinta/wakiilada iyo ardaydaba in xasuusnaadaan calaamadaynta sanduuqyada B ama C in ay tahay SPS ma siideyn doonto akhbarta cunugaaga ciidamada. Si-kastaba, taas macnaheedu ma aha ciidamadu in aanay ka heli Karin macluumaadka ardayga meelo aan ahayn dugsiyada dowlada seattle. Taas waxa dheer, calaamadaynta sanduuqa B am C kama daafacayo in ciidamadu la hadlaan cunugaaga ay yimaadaan xaydaanka dugsiyada.

Fadlan calaamadi hal sanduuq kuna soo celi foomkan dugsiga cunugaagu dhigto ugu dambayn **1da Octoobar**. Haddii **waalidiinta/wakiilka iyo ilmahoodu aanay calaamadin mid ka mid ah sanduuqyada ama foomka soo celin, ama aan calaamadin sanduuqa A ama sanduuqyada kale , SPS waxay u qaadanaysa jawaab la’aan in lagu dooro sanduuqa A**

Waxa leh fasalada Sagaal ilaa Laba iyo toban(9-12) :

Fadlan calaamadi hal sanduuq

- A. Waan ogolay in la sii daayo tusaha akhbaatta ee ku saabsan ardayga macagiisu hoos ku qoran yahay.
- B. Waxaan u ogolaaday in la sii daayo tusaha akhbaarta ku saabsan ardayga magaciisu hoos ku qoran yahay loo gudbiyo lakiin, . Looma diri karo, ciidamada iyo .
- C. ma ogoli in macluumaadka cunugayga magaciisu hoos ku qoran loo gudbiyo, marka laga reebo, kuwa sharciga ogolyahay .lama siin karo warbixinta ilmaheyga kooxda walidiinta,, kolejooyinka shaqooyinka iyo ciidamada,

Haddii aad xulato doorashada C Macluumaad lama sii daynayo, Macluumaadka ilmahaaga laguma soo darayo waxyaabahan soo socda haddii aadan soo buuxin qaybtan hoose soona celin Oktober 1. Haddii aad ogolaato, in ilmahaaga warbixintiisa aad la wadaagto fadlan ku muuji ogolaanshahaag sanduuqa ku haboon ee hoose.

 Dugsiga Cinwaanka iyo / Tirada fasalaka

Waxuu diyaar u yahay qoysaska, shaqaalaha Iyo Ururka Waalidka, macalimiinta iyo Ardayda (PTSA). HAA, ku soo dar warbixintayada (Telefoonka,Cinwaanka iyo Imaylka)

 Boga Internetka/Warbaahinta Bulshada .

Sawirada ardayga iyo Fiidyoyada waxaa lagu soo dhejin karaa boga internetka Dugsiga iyo kuwa banaanka ee degmada. Magacyada lama soo dhejinayo. HAA, Sawirka iyo fidyowga ilmahayga waa lagu soo dhjin karaa barha bulshada.

 Buug sanadeedka/fasaxida sawirka fasalka

HAA, Waxaan siinayaa oggolaanshahayga in sawirka ardayga iyo magacaba lagu daro buuga sanadeedka iyo sawirka fasalka

KU QOR Magaca Saxiixa oo dhan
Student's name

Taariikhda Dhalashada
Date of Birth

ID nambarka ardayga Dugsiga
Student's School ID Number

Ku qor magaca waalidka
Print Signer's name

Waalidka/Wakiilka/Saxiixa Ardayga Xaqa u leh
Name of parent/guardian

Taariikhda
Date

FADLAN U SOO CELI FOOMKAAN SI TOOS AH DUGSIGA ARDAYGAMID SHAQSI AHAAN U KEENTO AMA UGU SOO DIRTO BOOSTADA

Haddii aad leedahay mid ka badan hal arday, waxaa lagaa rabaa in arday kastaba u buuxiso foomka si u gaar ah una soo celiso foomkaan dugsiga ubadka. Foomkaan waxaa lagu keedinayaa faylka ubadkaada ee dugsiga

Dib-u-darsid

7/2018